# Adeegsiga Badqabka leh ee Mashiinka Saladka Dugsiyada

## Qalabka

Qalabka sida mashiinka saladka iyo waaskada cunto diyaarinta waa in ay nadaafadooda ogolaadaan barnaamijka shahaadada ee aqoonsiga ka haysta Machadka Heerarka Qaran ee Maraykanka (ANSI) ee qalabka adeegga cuntada.

Mashiinkaaga saladka, waxaad adeegsan kartaa midkood:

- Qaybta farsamo ahaan loo talaagadeeyo si aad qaboow ugu hayso xakamaynta heerkulka badqabka cuntada (TCS) heerka 41°F ama kasii hoos.

**AMA**

- Bandhiga aan talaagada ku jirin, aadna u adeegsato Waqti ku Xakamaynta si loo fayo-dhowro Caafimaadka Dadwaynaha (TPHC) ee cuntada TCS.

Waaskada lagu diyaarsho cuntada ayaa loo baahan yahay dhaqista miraha iyo khudaarta ceeriinka ah si meesha looga saaro ciidda iyo sunta kale kahor intaan la jarin, la diyaarin, ama la bixin.

Miraha iyo khudaarta lasoo iibsado ee ay horay u dhaqeen warshadii soo diyaarisay ayaa ah kuwo u diyaarsan in la cuno.

## Kahortag xanuun cuntada ka dhasha

Farxalka ayaa ah qaabka keliya ee ugu haboon ee kahortaga faafida bakteeriyada iyo fayraska keeni kara cudur cuntada ka dhasha.

Qofka masuuliyada leh (PIC) waa inuu xaqiijiyaa in:

- Shaqaalaha iyo ardaydu ay ka hortagaan jeermiska cuntada bisil uga yimaada gacmahooda qaawan.
- Cuntada ku jirta mashiinka saladka waxaa jeermiska ka ilaaliya difaacyada cuntada, baakadaynta, maacuunta ama qaababka kale ee waxtarka leh sida in si joogto ah loo badalo maacuunta.
- Shaqaalaha loo tababaray habraacyada badqabka shaqada ayaa si joogto ah u kormeeraaya heerkulka iyo waqtiga cuntada ama raacaaya isticmaalka TPHC.
- Ardayda ku laabta mashiinka saladka waxaa loo sheegayaa inay adeegsadaan istiraashooyinka miiska oo nadiif ah.

## Waqti ku Xakamaynta si loo fayo-dhowro Caafimaadka Dadwaynaha (TPHC)

Dugsiyadu waa inay qoraan ayna raacaan habraaca TPHC haddii ay adeegsanayaan qaybta qaboojiyaha cuntada bandhiga ee cuntada TCS.

**Hennepin County Environmental Health**
479 Prairie Center Drive Eden Prairie, MN 55344
612-543-5200 | www.hennepin.us/envhealth
Safe use of salad bars in schools_Somali_HC_6-25
Content courtesy of the Minnesota Department of Health

## Shurruudaha

- Xili hore sii qor habraacyada oo si joogto ah ugu isticmaal xarunta cuntada. U diyaari habraacyada si uu kormeerahaagu u akhriyo.
- Si sax ah u qabooji cuntada haddii la diyaarshay, la karshay, talaagadana la gashay kahor adeegsiga TPHC.
- Ku astee qasacyada cuntada xiliyada ay qasabka tahay in cuntada la karsho, dadka la siiyo ama la daadsho.
- Ku kari, ku bixi ama ku daadi cuntada waqtiga ugu badan ee lagu cayimay astaanta qasaca marka laga saaro xakamynta heerkulka:
    - Cuntada kulul (135°F ama ka badan) waxaa la hayn karaa ilaa afar saacadood kadib marka laga saaro xakamaynta heerkulka.
    - Cuntada qaboow (41°F ama ka hoose) waxaa la hayn karaa ilaa afar saacadood kadib marka laga saaro xakamaynta heerkulka haddii aan heerlkulka kormeer lagu wadin.
    - Cuntada qaboow (41°F ama ka hoose) waxaa la hayn karaa ilaa lix saacadood kadib marka laga saaro xakamaynta heerkulka haddii aan heerlkulka kormeer lagu hayo uusana marna ka badan 70°F.
- Marka TPHC la bilaabo, haku celin cuntada qaybta xakamaynta heerkulka.
- Iska tuur cuntada ku jirta qasacyada aan calaamadaysnayn ama aan sida saxda ah loo calaamadin.

## Habraacyada qoran

Habraacyadaadu waa inay qeexaan sida aad kormeerka ugu samayn doonto, u calaamadayn doonto, una daadin doonto cuntada aad hayso adoo adeegsanaaya TPHC. Cuntada la diyaarsho, la karsho, kadibna talaagada la gasho kahor intaan la isticmaalin TPHC, habraacyadaadu waa inay sidoo kale qeexaan sida aad u buuxinayso shuruudaha qaboojinta amaanka ah.

*La xariir kormeerahaaga si uu kaaga caawiyo abuurista habraacyo waafaqsan shuruudaha TPHC.*

**Hennepin County Environmental Health**
479 Prairie Center Drive Eden Prairie, MN 55344
612-543-5200 | www.hennepin.us/envhealth
Safe use of salad bars in schools_Somali_HC_6-25
Content courtesy of the Minnesota Department of Health